

DHAKHTAROW!

KU SAABSAN XANUUN

BAABI'YAASHAAN...

Hage ay fududahay in loo isticmaalo in lagu bilaabo wada sheekaysiga.

Opioid-yada la isu qoro waa daawooyin aad loola qabatimo oo horseedi kara in lagu tiirsanaado. Si loo badbaadsanaado, marwalba waydii dhakhtarkaaga wixi ku saabsan khataraha iyo waxyaabaha laga qaadi karo kahor inta aadan qaadan.

Waxaa halkaan ku yaalla su'aalaha ugu muhiimsan oo ay tahay inaad waydiiso si aad waxbadan uga ogaato waxa lagu qoray:

- Maxay tahay sababta aad daawadan iigu qorayso halki aad ii qori lahayd xanuun baabi'ye aan ahayn opioid?
- Intee in le'eg ayaan qaataa iyo inta jeer?
- Muddo intee la'eg ayaan u baahanahay inaan qaato middan?
- Ma la qabatoomi karaa middan, oo degdeg intee la'eg ayay taasi ku dhici kartaa?
- Ma khatar weyn baan ugu jiraa inaan la qabatoomaha marka loo eego taariikhdayda caafimaad?
- Waa maxay calaamadaha lagu garto inaan noqonayo mid ku tiirsan ama la qabatoomay?
- Miyay tani iiga tan badan kartaa, maxayse iska tan badin u eg tahay?
- Guriga ma dhigtaa naloxone (NARCAN®), sideese ayay u shaqaysaa?
- Sideen ugu ilaaliyaa si badbaado ah si aan uga hortago inay si khaldan u isticmaalaan dadka kale?